

# WAXAA IDIN SOO GAARAYA WARKA UGU XIISAHA BADAN EE GOBOLKA WASHINGTON LOOGA SHEEKEYSNAYO... FASAXA CAAFIMAADKA IYO QOYSKA EE LACAG LA SIIYO

Waxaa idin soo gaaraya warka ugu xiisaha badan ee gobolka washington looga sheekeysnayo ... fasaxa caafimaadka iyo qoyska ee lacag la siiyo Laga bilaabo bisha Janaayo 2020, Lacagta Fasaxa Caafimaadkaiyo Qoyska waxa uu shaqaalaha u suurogelinayaa in ay ehelkooda la joogaan farxad iyo murugaba la wadaagaan – iyada oo culeysna dhaqaale aan ku aheyn goobaha ganacsiga.



## Yaa maalgeliya Fasaxa Caafimaadka iyo Qoyska?

Fasaxa Caafimaadka iyo Qoyska ee shaqaalaha lacagta la siinayo waxaa laga bixinayaa ceymiska gobolka oo shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha lacag ku darayaan laga bilaabo 1da janaayo 2019. Ganacsatada ay u sahqeeyaan wax ka yar 50 shaqaale (oo ah 96% ganacsiga Washington) waxa ay kala doonayaan in ay ceymiska lacag ku bixiyaan ama shaqaalahooda aanay wax macaash ah ka Ceymiska Shaqada ee Washington. Goobaha ganacsiga ee doorta in ay bixiyaan lacagta ceymiska ee bil kasta, oo tirada shaqaalahoodu ka yar tahay 150, waxaa la siinaya ilaa 3,000 si ay ugu bixiyaan kharashka kaga baxa inta shaqaaluhu shaqada ka maqan yahay.



## Sidee ayaa Fasaxa Caafimaadka iyo Qoyska ee lacag la siinayo u shaqeeyaa?

Laga bilaabo 1da Janaayo 2020, shaqalaha waxa ay telefoonka, ama foomka la buuxiyo ku codsan karaan lacagta Fasaxa caafimaadka iyo Qoyska iyaga oo u soo gudbinaya Waaxda Ceymiska Shaqada (ESD), iyaga oo soo raacinaya macluumaadka ugu yar ee laga doonayo loo shaqeeyaha.



## Yaa xaq u leh inuu qaato Fasaxa Caafimaadka iyo Qoyska ee Mushaharku u soconayo?

Qof kasta oo hal shaqo ama laba goob shaqo ka shaqeeyey ugu yaraan 820 saacadood sanadkii la soo dhaafayayaa xaq u leh fasaxa caafimaadka iyo qoyska ee lacag la siinayo. Dadka iskood u shaqeysta way ka qeyb qaadan karaan barnaamijka.



## Waa imisa mudada Fasaxa Caafimaadka iyo Qoyska sidee ayaase loo adeegsanayaa?

Sanad kasta, shaqaalaha waxaa loo ogol yahay:

- 12 todobaad oo fasax ah ee lacagta la siinayo si ay u wehliyaan ilmaha u dhashay ama u xanaaneeyaan qof qoyska ka tirsan oo xanuun la il daran AMA
- 12 todobaad oo fasax ah si ay uga soo kabtaan xaalad caafimaad oo la soo deristay

Shaqaaluhu waxa ay wada qaadan karaan ilaa 16 todobaad oo fasaxa qoyska iyo caafimaadka ah sanad kasta iyo fasaxa waalidku dhib kala kulmo uurka ilaa 18 todobaad oo lacag la siinayo.



## Imisa weeye lacagta Fasaxa Caafimaadka iyo Qoyska?

Shaqaalaha waxaa la siinayaa boqoleey laga xisaabay mushaharkooda, iyada oo shaqaalaha dakhligoodu yar yahay la siinayo ilaa 90% mushaharkoodaa halka shaqaalaha mushaharkla badan qaatay la siinayo wax yar oo ka mid ah mushaharkii ay qaadan jireen. Lacagta ugu badan ee todobaadkiiba waa \$1000.

SAACADDII INTA LA SIIYO	LACAGTA AY BIXINAYAAN TODOBAAD KASTA	LACAGTA UU BIXINATO TODOBAADKII		LACAGTA LA SIINAYO TOBODAADKIIBA
		SHAQAALAHA	LOO SHAQEYAHA	
\$13.50	\$28,000	\$1.36	\$0.80	\$486
\$26	\$54,000	\$2.62	\$1.54	\$746
\$40	\$83,000	\$4.03	\$2.37	\$1,000

Si aad wax dheeraad ah uga ogaato, iyo talaabada aad qaadeyso: [momsrising.org/paidleavewa/so](https://momsrising.org/paidleavewa/so)